

Warbixinno qoraal ah oo loogu talagalay ardayda baranaysa Ingiriisiga oo ah luqad dheeraad ah ama lahjad ah

Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha

Waalidiinta iyo daryeelayaasha sharafta leh

Waxaad ka helaysaa laba warbixin oo qoraal ah oo ka socda dugsiga ilmahaaga sannad kasta. Warbixinnadani waxay kaa caawin doonaan inaad fahamto sida ilmahaagu u horumarayo iyo sida dugsigu u taageerayo waxbarashada ilmahaaga. Warbixinta ayaa muujin doonta horumarka ilmahaagu ka samaynayo maaddooyinka oo dhan.

Warbixinnada loogu talagalay Ingiriisiga oo dhan oo luqad dheeraad ah ama lahjad ah (English as an additional language or dialect (EAL/D))

Haddii ilmahaagu baranayo Ingiriisiga oo luqad dheeraad ah ama lahjad ah, warbixinta ayaa muujin doonta horumarka ilmahaaga ee barashada luuqada Ingiriisiga iyo heerkooda haatan ee aqoonta luuqadda Ingiriisiga. Heerarku waa bilawga, soo-koraya, horumaraya ama xoogoobaya. Fadlan fiiri bogga dambe ee sharraxaada heerarkaas.

Warbixinta ardayda ee barnaamijka EAL/D

Haddii ilmahaagu ku jiro barnaamijka EAL/D waxay heli doonaan warbixin dheeraad ah oo qoraal ah oo ka timid baraha EAL/D oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan horumarkooda barashada luuqada Ingiriiska.

Warbixinnada loogu talagalay ardayda dhawaanta timid ee EAL/D

Haddii ilmahaagu ku jiro barnaamijka EAL/D oo uu ku sugnaa dugsi Australiyaan ah afar teeram ama ka yar, warbixinta qoraalka ee ilmahaaga waxaa ku jiri doona macluumaad ku saabsan horumarkooda barashada Ingiriisiga iyo sidoo kale horumarkooda maadooyinka kale ee ay bartaan ayadoo ah faallo halkii ay ka ahayd buundo.

Warbixinnada loogu talagalay ardayda EAL/D ee dhawaan timid oo dhigta xarumaha Ingiriisiga degdegga ah ama Dugsiga Sare ee Ingiriisiga degdegga ah

Haddii ilmahaagu ku qoran yahay Xarunta Ingiriisiga Degdegga ah ama Dugsiga Sare ee Ingiriisiga degdegga ah, waxaad heli doontaa warbixin qoraal ah oo ku saabsan horumarkooda barashada Ingiriisiga. Intaas waxaa sii dheer warbixinta oo muujin doonta horumarka maadooyinka oo dhan oo lagu barto isku diyaarinta dugsiga sare.

Heerarka Barashada Luuqadda Ingiriisiga

Bilaabidda	Ardayda heerka bilowga ah waxay bilaabayaan inay bartaan Ingiriisiga. Waxay ku hadli karaan hal ama in ka badan luqadaha aan Ingiriisiga ahayn waxaana laga yaabaa inay leeyihiin heer ku haboon akhris-qoraalka luqaddooda koowaad. Ardaydani waxay bilaabayaan inay ku lug yeeshaan hawlaha luuqadda fudud ee manhajka.
Soo-koraya	Ardayda heerka soo-koraya waxay leeyihiin aqoon sii kordhaysa ee Ingiriisiga. Ardaydani waxay ku hadli karaan hal ama dhowr luqadood oo ay ku jiraan Ingiriisiga aasaasiga ah, oo leh aqoon kordhaysa oo ah Ingiriis qoraal ah. Ardaydani waxay awoodaan inay kaqaybqaataan hawlaha fasalka waxayna ku lug yeeshaan barashada marka la siiyo barashada luuqada ku habboon iyo waqti dheeraad ah si loo dhamaystiro hawlaha fasalka.
Horumarinta	Ardayda heerkan kobcaya waxay ku hadli karaan hal ama dhowr luqadood, oo ay ku jiraan Ingiriisiga wax-qabad ah, oo leh aqoon kororsi ah Ingiriis qoraal ah. Ardaydani waa ka qaybgalayaal firfircoon ee fasalka iyo hawlaha joogtada ah ee dugsiya, waxayna awood u leeyihiin inay ku hawlanaadaan hawlaha barashada iyagoo leh guul sii kordhaysa. Luqaddooda koowaad waxay sii wadaa inay noqoto taageero qiimo leh intay kobcinayaan xakamaynta naxwaha Ingiriiska iyo dhisida erayada.
Sii-xoogoobaya	Ardayda ku jirta heerka sii-xoogoobaya waxay ku hadli karaan hal ama dhowr luqadood, oo ay ka mid yihiin Ingiriisiga waxayna u leeyihiin aqoon fiican Ingiriisiga qoraalka ah. Ardaydani waa ka-qaybgalayaal madaxbannaan ee fasalka dhexdiisa iyo hawlaha joogtada ah ee dugsiya, waxayna leeyihiin karti kordhaysa si ay ugu adeegsadaan Ingiriisiga si ay ugu lug yeeshaan barashada oo leh guusha guud. Waxay fahmayaan oo ay soo saaraan qoraal iyo hadal qoraal ah oo loogu talagalay ujeedooyin gaar ah, laakiin waxay weli u baahan yihiin barashada luuqada diirada saarida baridda luqadda iyo istaraatiijiyadaha taageerada ardayda EAL/D, sida luqadda tacliinta luqadda qaybaha maaddooyinka kordhaya.

Adeega Turjumaanka Taleefanka ah

Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriir dugsiya. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya inaad la xiriirto dugsiya, fadlan ka wac Adeega Turjumaanka Taleefanka (TIS) 131 450 waxaadna weydiisaa turjumaan luqaddaada ah. Turjumaanku wuxuu soo wici doonaa dugsiya oo wuxuu joogi doonaa khadka si uu kaaga caawiyo wadhadalka. Lacag lagaama qaadi doono adeeggan.